

Wararka beenta ah inta badan run ayay u eeg yihiin.

ISTAAG.

Warku dareen weyn ma kugu abuuray?

Wararka dadka ku abuura dareenno waaweyn, waxa aad u sii faafiya dad badan. Taas darteed waxa jira qaar ka mid ah baraha internetka oo soo geliya wararka noocaas ah si dad badan u soo galaan. Waxa wacan in aad taxadar samayso marka aad dadka la wadaagayso wararka dadka ku abuuraya dareenno waaweyn.

Wararku ma yahay mid la yaab ah?

Wararka beenta ah inta badan waxay leeyihiin cinwaanno dadka soo jiidanaya, XURUUF WAAWEYN iyo calaamadda qaylada! Ogow in cinwaanka iyo sawirku sheegayn warka oo dhan. Inta badan cinwaannada la yaabka ah ee aan la rumaysan karin, waxay noqdaan been.

FEKER.

Ma run baad mooday sawirka?

Sawirkuba been ayuu sheegi karaa. Wararka beenta ah waxay inta badan si khaldan u isticmaalaan sawirrada. Teknooloojiyada casriga ah ayaa islamarkaana sahlaya in la sameeyo fiidyow iyo codad been ah, waa waxa loo yaqaano deepfakes ama beenta fog.

Ujeedada warku ma tahay inuu beddelo aragtidaada?

Inta badan arrin kasta wuxu leeyahay dhinacyo badan. Taas darteed ka taxadar in aad dhinac keliya warka ka qaadato. Farriimo culus oo siyaasadeed ama andacooyin xagjir ah ayaa la faafinayaa, taas darteed waxa wacan in la iska habsado.

HUBSO.

Warku ma ku jiraa meelo kale?

Warka la yaabka ah wuxu u faafaa si degdeg ah. Haddii warkaas laga waayo saxaafadda inteeda kale, waxa dhici karta in warku been yahay.

Yaa ka dambeeya warka?

Eeg cinwaanka bogga internetka. Wararka beenta ah waxay inta badan leeyihiin cinwaan internet ama muuqaal u eeg meel wararka laga helo oo caan ah. Hubso cidda warka soo dirtay iyo waxa dadka kale ka sheegayaan meeshaas.

Talooyinka oo kooban:

Haddii aad taabatid, aad wadaagtid, aad jeclaactid ama aad faallo ka dhiibatid wararka beenta ah, waxa aad ka mid noqonaysaa dadka beenta sii faafinaya. Taas darteed: Iska hubso! Talooyin kale oo ku saabsan sida aad ku ogaan karto in warku been yahay waxaad ka helaysaa barta medietilsynet.no/stopp-tenk-sjekk